Australian Government
Department of Home Affairs

# Macluumaadka loogu talagalay dadka haysta fiisaha heerka (Subclass) 202

## Hordhac

Waxaa lagu siiyay fiisaha heerka 202 (Global Special Humanitarian) fiisaha ah.

Qaadashada fiisahan, waxay awood kuu siinaysaa

- inaad waligaa joogi karto Australia
- inaad ka shaqaysan karto waxna ku baran karto gudaha Australia
- inaad iska diiwaangeliso nidaamka daryeelka caafimaadka dadweynaha ee Australia, Medicare
- inaad u codsato xubno ka mid ah qoyskaaga deganaansho rasmi ah
- inaad u safarto kana soo safri karto Australia muddo 5 sano ah
- haddii aad u qalanto inaad noqoto muwaadin Australian ah
- inaad xiisadaha luqadda Ingiriisiga lacag la'aan ku baran karto iyada oo loo marayo Barnaamijka Ingiriiska Ee Loogu Talagalay Soogalootiga Qaangaarka ah ( Adult Migrant English Program).

Kani waa fiisaha joogtada (permanent visa) ah. Wuxuu kuu ogolaanayaa inaad waligaa joogto Australia. Waxaad noqonaysaa qof si joogto ah u degan maalinta aad Australia ku soo gasho fiisadan. Marka laga hadlayo inaad noqoto muwaadin (citizenship), degenaanshahaaga joogtada ahi waxa uu bilaabmayaa maalinta aad Australia ku soo gasho fiisadan.

## Tegista Australia

Adiga iyo qofka kuu dacwooday waxaad la xidhiidhi kartaan maamulaha kiiskaaga Toll si aad u qorsheysaan safarka. Kharashka safarka waa dhankaaga ama qofka kuu dacwooday ayay masuuliyad ka saaran tahay.

Caawimaad ku aadan safarka Australia waxa kale oo laga heli karaa Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka (International Organization for Migration - IOM) wixii hoos yimaada barnaamijkooda socdaalka safarka ee hore loo sii bixiyo. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa bogga IOM https://australia.iom.int/travel-assistance-migration-australia-iom-australia.

Adiga ama qofka kuu dacwooday ayaa laga rabaa inaad u sheegtaan Waaxda wixii ku saabsan taariikhda/xogta safarkaaga si aan u hubinno inaad hesho martiqaad aad kaga qaybgasho barnaamijka Barashada Dhaqanka Australia ( Australian Cultural Orientation - AUSCO) ka hor intaadan u safrin Australia iyo kaalmada dejinta markaad timaadid Australia.

### Heerka Socdaalka Australia (Australian Migration Status - AMS) ImmiCard

Dawlada Australia waxay siisaa AMS ImmiCard dadka haysta fiisaha heerka 202 iyo fiisooyinka kale ee bini'aadantinimo. AMS ImmiCard waa dukumeenti safar oo ay aqoonsan yihiin Ururka Duulimaadyada Rayidka Caalamiga ah (International Civil Aviation Organization - ICAO). Sidoo kale waa dukumeenti

aqoonsi oo aad ku isticmaali karto gudaha Australia si aad u caddayso u-qalmitaankaaga adeegyada dawladda iyo inaad ku ogaato macluumaadka fiisahaaga.

Waxa laga yaabaa inaad u isticmaasho dukumiintiga ImmiCard-kaaga safarkaaga rasmiga ee aad hal mar kaliya ugu socdaaleyso Australia. Waxaa kujira qalab mashiinku akhriyi karo oo awood u siinaya shaqaalaha diyaaradda inay hubiyaan fiisahaaga. Waa inaad ku soo bandhigtaa ImmiCard-kaaga garoonka diyaaradaha, haddii kale ma awoodid inaad u safarto Australia. Toll ayaa ku siin doonta ImmiCard ka hor intaadan u safrin Australia.

Haddii aad haysato baasaboor oo aad rabto inaad u isticmaasho safarkaaga Australia, waa inaad noo sheegtaa taas si aan ugu xidhno fiisahaaga. Si aad noogu soo sheegto baasaboorkaaga, ama wixii isbedel ah ee ku imaado baasaboorkaaga, aad https://immi.homeaffairs.gov.au/change-in-situation/passport-detailsoo dooro meesha ay ku qoran tahay 'Update Details - Web Form''. Haddii aadan tan samayn, waxaa laga yaabaa inaadan u safri karin Australia.

Haddii aad rabto inaad u safarto meel ka baxsan Australia markaad timaado Australia ka dib, waa inaad haysataa baasaboor sax ah ama dukumeenti socdaal ee loogu talagalay qofka aan muwaadinka ahayn (non –citizen) (kaas oo laga heli karo Xafiiska Baasaboorka Australia).

Haddii aad rabto inaad u safarto oo aad ku laabato Australia 5 sano ka dib laga bilaabo taariikhda lagu siiyay fiisahaaga, waxaad u baahan doontaa fiisaha uu kusoo noqon karo Qofka Degenaanshaha Heysta (Resident Return visa) inaad noqotay muwaadin Australian ah mooyee.

## Hubinta caafimaadka markaad baxayso

Maamulaha kiiskaaga Toll ayaa ku sheegi doona inaad marto baaritaan caafimaad oo lacag la'aan ah 72 saacadood ka hor intaadan u safrin Australia.

Baadhitaankaaga caafimaad ee intaadan bixin kahor waxaa qeyb ka ah:

- hubinta inaad caafimaad aad ku safri karto qabto
- baaritaanka jirka
- baaritaanka uurka
- baaritaanka cudurada faafa
- Tallaalada haddii loo baahdo, sida jadeecada (measles), qaamo-qashiirta (mumps) iyo rubella
- daawaynta gooryaanka haddii loo baahdo

Waa inaad ogolaato inaad u hesho daryeel caafimaad xaalad kasta oo caafimaad kadib markaad timaado Australia.

## Barnaamijka Barashada Dhaqanka Australia (Australian Cultural Orientation - AUSCO).

Waxaa lagugu martiqaadi doonaa inaad ka soo qaybgasho fadhiyada AUSCO ka hor intaadan u safrin wixii talooyin ku saabsan safarkaaga Australia ah. Kulamadan waxaad ku heli doontaa horudhac nolosha Australia ah oo ay ku jiraan adeegyada dejinta, guriyeynta, wa xbarashada iyo shaqada.

Ujeedada barnaamijka AUSCO waa:

- in lagu bixiyo macluumaad sax ah oo ku saabsan hababka bixitaanka
- in lagu sharaxo habka dejinta laguna bixiyo macluumaad wax ku ool ah oo ku saabsan adeegyada dejinta imaatinka ka dib iyo sida loo heli karo
- in lagu soo bandhigo sawirka dhabta ah ee nolosha Australia
- in lagugu dhiiri geliyo barashada luqadda Ingiriisiga markaad Australia imaado
- in ka qaybgalayaasha lagala hadlo xirfadaha aasaasiga ah ee lagama maarmaanka u ah sidii loo gaari lahaa isku filnaansho
- in ka-qaybgalayaasha ay helaan xogta lagama maarmaanka ah si ay ula tacaalaan walaaca dejinta bilowga hore iyo heerarka kala duwan ee la qabsashada dhaqanka, bulshada iyo dhaqaalaha. Tan waxa ku jira macluumaadka ku saabsan sharciyada iyo xeerarka Australia.

Barnaamijkan 5-ta maalmood ah waa mid lacag la'aan ah wuxuuna u furan yahay dhammaan dadka haysta fiisaha bani'aadamnimada ee da'doodu ka weyn tahay 5 sano. Waxaa loogu talagalay inay ku siiso faham nolosha Australia ah ka hor intaadan iman.

Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka (International Organization for Migration - IOM) waxaa qandaraas lagu siiyay inay barnaamijka u gudbiyaan iyagoo ka wakiil ah Waaxda, wayna kula soo xiriiri doonaan si ay kuugu casuumaan inaad ka soo qaybgasho fasalka AUSCO.